

FoodShare



WISCONSIN

A Recipe for Good Health



Warbixinta Lixda Bilood ee FoodShare

(FoodShare Six-Month Report)

Haddii qoyskaaga loo oggolaaday taageerada cuntada ee FoodShare in ay qaataan ilaa iyo 12-bilood, waxaa khasab idinku ah inaad soo buuxisaan FoodShare Six-Month Report (foom ah warbixin la idinka rabo lixdii biloodba mar) si aan la idiinka goosan. Foomka Warbixinta Lixda Bilood iyo habka loo buuxiyo guriga ayaa la idiinku soo dirayaa usbuuca ugu dambeeya markay shan bilood ka soo wareegato FoodShare. Tusaale, haddii manaafacaadka lagu bilaabo Jannaayo, waxaa lagu soo dirayaa foomka Warbixinta Lixda Bilood usbuuca ugu dambeeya ee Meey.

Ogow: Haddii aad tahay qof waayeel ah, qof indha la', ama qof naafo ah oo aan shaqeyn, ama haddii aad tahay qof hoy la'aan ah oo la siiyo FoodShare, lagaama rabo in aad soo buuxiso foomka Warbixinta Lixda Bilood oo laguuma soo dirayo.

Kama-dambeysta

Haddii aad rabto inaan lagaa goosan manaafacaadka FoodShare oo aad ku sii jirto, waxaa khasab ah inaad ka soo warbixiso macluumaadka gurigaaga laga rabo, oo waa inaad warbixinta ku soo buuxiso wakhtiga kama-dambeysta ah ee kuugu qoran foomka. Haddii aad soo buuxin weydo oo aad soo celin weydo Warbixinta Lixda Bilood, FoodShare waa lagaa goosanayaa.

Soo-buuxinta Foomka Lixda Bilood ee FoodShare

Waa in aad ku soo buuxiso oo aad ku soo gudbiso foomka Warbixinta Lixda Bilood ee lagaa rabo mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

Habka 1: Ku soo buuxi oo ku soo gudbi foomka Lixda Bilood barta intarnetka ACCESS.

1. Ka eego access.wi.gov.

Ku gal summad kuu gaar ah oo guji linkiga FoodShare ee ka hooseeya Alerts ee qoraalka bidixda ka muuqda. Raac siyaabaha loo buuxiyo ee aad arki doonto oo sidaas noogu soo gudbi foomka.

2. Ku soo dheji caddeymaha jawaabahaaga.

Waxaa fikrad fiican ah in aad ku soo gudbiso caddeymaha jawaabahaaga ka dib markaad soo gudbiso foomka, gaar ahaan marka aad hayso macluumaad cusub ama is beddel kale. Tusaale, haddii aad noo



sheegeyso in aad heshay shaqo cusub, markaad foomka soo direyso waxaad noo soo gudbin kartaa koobbiga caddeynta mushaarka ee 30-kii cisho ee ugu dambeeyey. Waxaad foomka ka heleysaa tusaale ah sida aad u buuxineyso caddeynta Warbixinta Lixda Bilood. Haddii aad ku soo lifaaqi weydo caddeynta jawaabahaaga foomka aad soo gudbineyso, waxaa lagu soo dirayaa waraaq ah in lagaa rabo caddeyn.

Markaad soo gubiso foomka waxaad arki doontaa qeyb ah Your Next Steps (waxa kale ee lagaa rabo). Guji View and Submit Proof (Eeg oo Soo-gudbi Caddeyn). Caddeynta lagaa rabo mar kale ayaad soo gudbin kartaa. Wakhtiga xadirka ah, waa in aad soo gasho barta internetka oo aad gujiso Needed Documents (Caddeymaha La Rabo) oo ka hooseysa qeybta My Documents ee qoraalka bidixda ka muuqda.

Habka 2: Ku soo buuxi oo ku soo gudbi foomka Lixda Bilood barnaamijka taleefanka la gashto ee MyACCESS Mobile App.

1. Taleefanka gal MyACCESS app.

Ku gal summadda kuu gaar ah oo guji linkiga FoodShare. Raac siyaabaha loo buuxiyo ee aad arki doonto oo sidaas u soo gudbi foomka.

2. Furo oo akhriso foomka.

Foomka waxaa ku qoran macluumaadka lagaa hayo ee guriga aad ku nooshahay oo dhan. **Haddii aysan waxba iska beddelin** macluumaadka lagaa hayo, waa inaad saxiixdo oo aad soo dirto foomka. **Haddii ay jiraan is beddel**, waa inaad ku buuxiso oo aad noogu soo dirto foomka barta internetka ee ACCESS, teleefanka, boostada, ama fakis ahaan.

Habka 3: Ku soo buuxi oo ku soo dir Warbixinta Lixda Bilood taleefankaaga.

1. Taleefan u soo dir xafiiska.

Taleefanka xafiiska foomka ayuu kuugu qoran yahay. Waxa kale oo aad taleefanka xafiiska ka heleysaa internetka www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency/index.htm. Xafiiska markaad la soo xiriirto ayaad ku sii buuxin kartaa foomka haddii aad bilowday oo aadan dhammeyn.

2. Soo-diridda caddeynta.

Xafiisku wuxuu ku weydiin doonaa caddeymaha jawaabahaaga. Waxaad xafiiska ugu soo gudbin kartaa caddeymaha siyaabo kala ah fakis ahaan, MyACCESS app taleefanka kuugu jira, ama boostada.

Habka 4: Ku soo dir Warbixinta Lixda Bilood boostada.

1. Akhriso foomka laguugu soo diray boostada.

Foomka waxaa ku qoran macluumaadka lagaa hayo ee guriga aad ku nooshahay oo dhan. Waa khasab inaad akhrisato oo aad qeyb kasta buuxiso kana jawaabto su'aalaha oo dhan. Foomku waa su'aalo la xiriira wixii xaalka iska beddelay:

- Cinwaankaaga guriga
- Lacagta ijaarka, rahmaad, ama kharashka korontada
- Dadka guriga kugula nool oo dhan
- Waajibaadka sharciga ah ee sida masruufka carruurta
- Dakhlige shaqada ee qof kasta oo meel ka shaqeeya ama iskiis u shaqeysta oo ku nool guriga
- Haddii uu jiro dakhli aan la shaqeysan oo dadka qaar soo gala
- Dakhlige aan la shaqeysan haddii uu ka badan yahay \$50

Haddii aadan waxba ku sheegeyn qeybta is beddelka, calaamadi **No** oo dabadeedna buuxi qeybaha kuu harsan.

2. Boostada ku soo dir foomka iyo caddeymaha jawaabahaaga.

Bakhshadda lagu soo diray ku soo dir foomka aad buuxisay iyo caddeymaha jawaabahaaga. Caddeynta waxaa ka mid ah bishii hore jeegga mushaarka qeybta hoose, qoraalka caddeymo qofka iskii u shaqeysta ama meherad haysta, ama waraaq ah gunnada hawlgabka. Waxaad foomka ka heleysaa liis ah tusaaleyaal sida aad u buuxineyso caddeynta Warbixinta Lixda Bilood. Boostada ugu soo dir xafiiska wixii caddeyn ah oo aad hayso sida ku qoran foomka qeybtiisa kore.

Haddii aad soo dirto foomka oo aan wadan caddeymo aad ka jawaabtay ama aadan saxiixin, adiga ayaa laguugu soo celinayaa si aad u soo saxdo oo aad mar kale u soo dirto. Haddii uu foomku kaa lumo ama aan boostada laguugu soo dirin, taleefan u soo dir xafiiska oo ka codso foom kale in laguugu soo diro.

Habka 5: Ku soo buuxi oo ku soo dir Warbixinta Lixda Bilood fakis ahaan.

1. Akhriso foomka laguugu soo diray boostada.

Foomka waxaa ku qoran macluumaadka lagaa hayo ee guriga aad ku nooshahay oo dhan. Waa khasab inaad akhrisato oo aad qeyb kasta buuxiso kana jawaabto su'aalaha oo dhan. Foomku waa su'aalo la xiriira wixii xaalka iska beddelay:

- Cinwaankaaga guriga
- Lacagta ijaarka, rahmaad, ama kharashka korontada
- Dadka guriga kugula nool oo dhan
- Waajibaadka sharciga ah ee sida masruufka carruurta
- Dakhlige shaqada ee qof kasta oo meel ka shaqeyya ama iskiis u shaqeysta oo ku nool guriga
- Haddii uu jiro dakhli aan la shaqeysan oo dadka qaar soo gala
- Dakhlige aan la shaqeysan haddii uu ka badan yahay \$50

Haddii aadan waxba ku sheegeyn qeybta ah is beddelka, calaamadi **No** oo dabadeedna buuxi qeybaha kuu harsan.

2. Fakis ku soo dir foomka ama caddeymaha jawaabahaaga.

Fakis ku soo dir waraaqaha taleefanka loogu tala galay deegaanka aad ku nooshahay:

- 855-293-1822 Haddii aadan ku noolayn Milwaukee County
- 888-409-1979 Haddii aad ku nooshahay Milwaukee County

Iska hubso inaad waraaqaha labada dhinacba fakiska ku soo dirto.

Caddeynta waxaa ka mid ah bishii hore jeegga mushaarka qeybta hoose, qoraalka caddeymo qofka iskii u shaqeysta ama meherad haysta, ama waraaq ah gunnada hawlgabka. Waxaad foomka ka heleysaa liis ah tusaaleyaal sida aad u buuxineyso caddeynta Warbixinta Lixda Bilood.

Haddii aad soo dirto foomka adigoo ka jawaabin su'aalaha oo dhan ama aadan saxiixin, adiga ayaa laguugu soo celinayaa si aad u soo saxdo oo aad mar kale u soo dirto. Haddii uu foomku kaa lumo ama aan boostada laguugu soo dirin, taleefan u soo dir xafiiska deegaankaaga oo ka codso foom kale in laguugu soo diro.

Su'aalo

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan foomka Warbixinta Lixda Bilood, la xiriir xafiiska deegaankaaga.

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.